HM Government

Grenfell community updates

# Howlaha nabadgelyada soo socota ee Grenfell Tower

Sida aad la socotaanba, dowladda ayaa la wareegtey lahaanshaha Tower-ka bishii Luuliyo 2019. Waxaan mas'uul ka nahay ka yeelista meel amni iyo nabad leh illaa go'aan laga gaarayo mustaqbalkeeda. Tani waa sababta baaritaannada joogtada ah iyo dayactirku ay weli u socdaan, iyadoo la raacayo tallaabooyin amni oo adag, inta lagu jiro masiibada COVID-19.

Waxaan rabnaa in aan kuu sheegno howlaha daruuriga ah ee amniga ee bilaaban doona bilaha soo socda. Qandaraaslayaashu waxay rakibi doonaan dhismooyin cusub - taageerooyin culeys ka sameysan aluminium loo adeegsado dhismayaasha - si loo taageero kuwa lagu rakibay wax yar ka dib dabkii. Waxaan rabnaa in aan kuu xaqiijino in Tower-ka uu ammaan yahay oo uusan qatar keeneyn.
Howlahani waxaa ay sugayaan xasilloonideeda illaa go'aan laga gaarayo mustaqbalkeeda.

## Howlahee qabsoomi doonaa goorma ayaana la qaban doonaa?

Iyadoo la raacayo talobixin xirfadeed oo ka timid injineerada qaab-dhismeedka ee ka shaqeeya Tower-ka, **alaabada culus iyo kuwa dhaawaca soo gaarey ayaa u baahan in laga saaro.** Tan waxaa ku jira saxanada biyaha maraan, alaabada caddaanka ah iyo qalabka guryaha lagu rakibo oo ay ku jiraan saqafyada soo laalaada iyo tuubooyinka. Ka qaadista alaabada ayaa hoos u dhigi doonta culeyska dhismayaasha cusub ee lagu dhisey sidoo kalena waxay u abuuri doonaan meel u bannaan oo lagu rakibo. **Shaqooyinka ugu weyn waxaa ay bilaaban doonaan bisha Sibtembar waxaana loo fulin doonaa wejiyo isku xiga sanadka soo socda.**

• **Horaanta bisha Luuliyo, waxaa suurtagal ah in aad dareentid shaqooyinka horudhaca ah**, sida gaarsiinta qalabka goobta iyo ka qaadista qaar ka mid ah alaabada waaweyn goobaha la wadaago si qalabka meel la dhigo loogu banneeyo.

• **Laga bilaabo bisha Sibtembar, ka qaadista alaabaha waxyeelooyinka soo gaareen ee ku jira guryaha ayaa bilaaban doona.** Tani waxaa ay dhacaysaa oo keliya marka dhammaan degenayaashii hore lagu wargeliyo shaqada oo ay fursad u heleen in ay su'aalo weydiiyaan. Waxaan fahamsannahay in shaqadani ay noqon karto mid xasaasi ah waxaanan aad ugu faraxsannahay in aan kala hadalnno qoysaska murugaysan iyo deganayaashii hore ee Tower-ka si aan u siino faahfaahin dheeraad ah.

• Dabayaaqada dayrta, **shaqada ka saarida asbestos gudaha Tower-ka ayaa billaaban doonta.** Asbestos waxaa badanaa lagu isticmaali jiray dhismayaasha dahaarka, dhulka iyo saqafka ka hor sanadkii 2000. Shaqada goobta tan iyo dabkii waxaa ay raaceysey taxadar adag ee xagga amniga ah si loo helo badbaadada ugu badan. Ka saarida asbestos waa nidaam caadi ah oo ay qabtaan qandaraasleyaal takhasus u leh. Iyadoo caawineysa yareynta culeyska dhismaha ka sokow, waxaa ay hubineysaa sii amni ahaanshaha deganeyaasha deegaanka iyo sidoo kale kuwa ka shaqeeya dhismaha. Waxaan fahamsannahay in ay jiri doonaan su'aalo iyo walaac waxaana bixin doona faahfaahin dheeri ah, oo ay ku jirto taxadarka ay khabiiradeenna qaadi doonaan si loo hubiyo in aysan jirin faddarayn, ka hor inta aysan bilaabanin ka saarista asbestos.

**Kooxda maareynta goobta ee Grenfell ayaa diyaar u ah wada hadallada shaqsiyeed** oo ay la yeelanayaan qoysaskii hore ee deganaa Tower-ka, amaba xubnaha qoyska murugeysan, si ay u bixiyaan faahfaahin ku saabsan sida shaqooyinkani ay u saameynayaan guryaha (macluumaadka xiriirka ayaa ku yaalla dhabarka warqaddan). Waxaan sidoo kale sameynay in adeegyada caafimaadka deegaanka iyo adeegyada caawinta ay ka warqabaan in shaqooyinkan ay dhici doonaan waxayna kugu taageeri karaan in aad nala soo xiriirto haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

## Maxaa hore loo qabtay?

Bilooyinkii ku xigey masiibada ka dib, kooxda maareynta goobta waxay la shaqeeyeen qandaraasle takhasus leh iyo booliska si loo helo looguna celiyo alaabada shaqsiyeed ee dib loo soo celin karey, dib loo isticmaali karey ama muhiim u ahaa deganayaashii hore. Dhismayaal ayaa lagu rakibay gudaha Tower-ka dhexdiisa si ay

u taageeraan qaab dhismeedkeeda waxaana lagu dhejiyey nidaam kormeer casri ah si loo qiimeeyo xasilloonideeda. **Marxaladda xigta ee howlaha nabadgelyada ee Tower-ka waa rakibidda dhismooyin dheeri ah si loo hubiyo sii socoshada xasilloonida.**

Si loo hubiyo in shaqadu aysan faragelin caddaaladda, waxaan xiriir la sameynay Grenfell Tower Enquiry, booliska iyo baaraha si aan wax uga weydiino baahiyahooda Tower-ka. Dhammaantood waxay ku taliyeen in ay haystaan cadeynta ay u baahan yihiin kuna faraxsan yihiin in howlaha nabadgelyada ay bilaabato. Waxaan sidoo kale wadahadal la yeelannay kooxaha maxalliga ah ee ku saabsan howlahan soo socda, si aan u dhageysanno su'aalahooda iyo si aan howlaha uga wada xiriirno sida ugu macquulsan uguna habboon.

## Sidee shaqada loo qaban doonaa?

Waxaan fahamsannahay in dadka deegaanka ay lahaan doonaan walaac ku saabsan dhawaqa iyo carqaladeynta kale. Waxaan la hadleynaa shaqsiyaadka iyo ururada maxaliga ah, sida ururada dadka degan iyo iskuulada, si ay nooga caawiyaan inaan ku qabsano howlahan qaab ku leh saameynta ugu yar kuwa ku nool, ka shaqeeya ama wax ka barta meel u dhow goobta.

Waxaan sidoo kale la shaqeyneynaa qandaraasleyaasheena si aan u fahanno sida carqalada ku noqon kara dadka deegaanka, sida dhawaqa iyo marinka gawaarida, loo yarayn karo, tusaale ahaan, iyadoo lagu xaddidayo shaqooyinka maalmo gaar ah. Kormeerka tayada dhawaqa iyo hawada ayaa hubin doona in shaqadu tixgelinayso derisyada Tower-ka waxaanna ay waqti dhow bixin doontaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan arrintaas. Waxaan faraynaa qandaraasleyaasha in ay u shaqeeyaan si mas'uuliyad leh waxaanan kormeeri doonnaa si loo hubiyo in ay taasi dhacdo. Heshiiskeenna jira ee qandaraaslaha goobta ayaa waqtigiisu dhacayaa dhowaan, sidaa darteed waxaan dib u eegi doonnaa shirkadaha suurtagalka ah in ay fuliyaan qaar ka mid ah shaqooyinka dambe. Waxaan dhowaan bixin doonnaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamkaas, oo ay ku jiraan sida aad uga qeybqaadan karto haddii aad jeclaan lahayd in aad ka mid noqoto.

Tallaabooyin ayaa sidoo kale la qaadayaa si loo hubiyo in shaqadan muhiimka ah loo fuliyo si nabadgelyo ah cimilada hadda jirta ee COVID-19 awgeed, si loo yareeyo in kuwa ka shaqeeya goobta isku dhawaadaan loona hubiyo in ay ku shaqeeyaan nabadgelyada munaasibka ah iyo qalabka ilaalinta shaqsiyeedba mar kasta.

**Fadlan la xiriir kooxda maamulka goobta haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah oo la xiriira khalkhal suurta gal ah oo ka dhasha shaqooyinka ama dhinac kasta oo qaab-howleedkeena la xiira.** Nabadgelyada iyo samaqabka dadka deegaanka ayaa ah mudnaantayada waxaanna u qaban doonnaa shaqada sida ugu taxaddarka leh intii suurtagal ah.

## Waa maxay mustaqbalka ee Tower-ka?

Shaqooyinkan badbaadada ahi ma ahan in ay dumin doonto Tower-ka. Waxay ku lug leeyihiin ka qaadis taxaddar leh alaabada dabacsan iyo qaar ka mid ah waxyaabaha aan qaab dhismeedka aheyn ee gudaha Tower-ka iyo rakibida dhismayaal dheeri ah si loo hubiyo sii xasilloonida illaa go'aan laga gaarayo mustaqbalkeeda. Agabyada ayaa u baahanaya in meesha laga saaro wax alla oo uu noqdo mustaqbalka Tower-ka. Go'aanka wuxuu ku salaysnaan doonaa talo ka timaada khubaro madax-bannaan waxayna dhici doontaa oo keliya kadib la-tashiga qoysaska murugaysan, kuwa ka badbaaday iyo dadka deegaanka ah. Waxaad sidoo kale ku lug yeelan doontaa tallaabo kasta oo safarkan ka mid ah, oo ay hogaaminayso Grenfell Tower Memorial Commission, si la isugu waafaqo xusuus ku haboon.

## Sida loola xiriiro ama loo helo macluumaad dheeri ah

**Kani waa kii ugu horreeyay ee ka mid ah dhowr macluumaad oo aan ku bixin doonno email, khadka tooska ah iyo boostada oo ku saabsan shaqooyinkan marka ay sii socdaanba.** Waxaan sii wadaynaa in aan si dhow ula shaqeynno kooxaha maxalliga ah iyo ururada si aan u hubinno in ay hayaan macluumaadka ay u baahan yihiin.

Waxaan fahamsannahay in shaqadu ay sababi karto ciriiri ama raaxa-darro waxaanna diyaar u nahay wadahadal shaqsiyeed adiga iyo qoyskaaga oo aan uga jawaabno wixii su'aallo ah ee aad qabi kartid.

- **Kooxda maareynta goobta:** Email u dir GrenfellTowerSite@communities.gov.uk amaba taleefoon **0303 444 0011**

- **Ku soo biir maalinta su'aalaha iyo jawaabaha ee dhaceysa Isniinta 27 Luuliyo, 6–7 galabnimo** (fadllan email noogu soo dir si aad u hesho tafaasiisha ku soo biirista iyo in aad noo soo dirto su'aalahaagaba). Dhacdo kale ayaa dhici doonta bisha Sibtembar isla markaana faahfaahinta ayaa la soo diri doonaa waqti u dhow dhacdada.

- **Taleefoon iska soo diris ayaa la sameyn karaa maallin kasta oo Arbaca ah, 10 - 12 dhuhurnimo**
  Taleefoon **0303 444 9086**

*Eeg calaamadaha elektrooniga ah ee goobta, kuwaaas oo ay ku qorran yihiin macluumaadkii ugu danbeeyey ee ku saabsan shaqada. Macluumaadkan iyo waraaqahan ku saabsan howlaha nabadgelyada ayaa laga heli karaa internetka halkan: www.gov.uk/government/topical-events/grenfell- community-updates.*
*Macluumaadkan ayaa sidoo kale mar dhow lagu heli doonaa luqadaha kala duwan.*

**Si aad u hesho Guddiga Xuska Grenfell Tower (Grenfell Tower Memorial Commission):**
Grenfell Tower Memorial Commission
- Email u dir **GTMCSecretariat@communities.gov.uk** amaba taleefoon **0303 444 4831**
- Soo booqo **www.grenfelltowermemorial.co.uk** halkanna kaga biir liiska emailada **contact** page)

**Ministry of Housing, Communities and Local Government (3 July 2020)**